Jawaabaha su'aalaha ku saabsan xuquuqda codsadeyaasha iyo kuwa heysta magangalyada caalamiga ah.

1. ***Magangalyo doonka giriiga jooga waxa uu leeyahay xuquuqaha soo socda.***
   I. Waxaa la siinayaa kaarka caalamiga ee magangalyada kaasoo u sahlaayo si sharci ah ku jooga wadanka gudahiisa.
   II. Waxaad leedihiin daryeel caafimaad oo lacag la'aan ah.
   III. Carruurtiina waxay tegi karaan iskuulka.
   IV. Waxaad xaq u leedihiin in guri la idin dejiyo iyadoo loo tixraacayo liiska hoos ku qoran.
   V. Waxaad xaq u leedihiin inaad shaqeysatiin iyadoo la fiirinayo xaaladaha soo socda

2. ***Ma Waxaa jira xaq guri dejin?***
   Dadka magangalyo doonka ahi iyadoo loo fiirinayo wareegto madaxeedka 220/2007 waxa ay xaq u leeyihiin meel dejin. waxaana mas'uul ka ah wasiirka shaqada. Xarunta magangalyada waxa ay mas'uul ka tahay in ay u gudbiso codsiga dadka magangalyo doonka ah una gudbiso dadka mas'uulka ka ahi, Xarunta Qaranka eeisku xirka Bulshada), qeybna ka ah wasaarada shaqada, inkastoo ay xaq u leeyihiin guri dejin dadka magangalyo doonka ah xilligani waxaa laheli karaa ku dhawaad 1000 boos kana banan meelaha dadka la dejiyo taasoo aysan awood u laheyn in ay haqab tiraan dhamman codsiyada. Dadka heysta sharicga qaxootinimada iyo kan bini'aadanimada xaq uma lahan in meel la dejiyo iyadoo la fiirinaayo sharciga midowga yurub ee magangalyada.

3. ***Awood ma u leedahay dowlada in ay shaqo noo hesho?***
   Inkasto ay xaq u leeyihiin in ay shaqeystaan dadka magangalyo doonka iyo kuwa sharciga heysto, dowlada awood uma lahan in ay u balan qaado boos shaqo ah, sida dadka gariiga oo kale.

4. ***Waa maxay xuquuqda ay leeyihiin dadka heysta sharciga magangalyada caalamiga ahi (sida kan qaxootinimada iyo kan bini'adanimada) ee Giriiga?***
   I. Waxaa lagu siin doonaa ogolaansho deganaansho oo lacag la'aan muddo saddex sano ah kaas oo la cusboonaysiin karo, Ogolaanshaha/degenaashaha waxaa la dhiibi doonaa 1-2 bilood ka dib qaadashada go'aan fiicaan aqbalida. Ilaa markaa waxaad ku heysan

doontaa  gacmahaaga kaarka caalamiga ah oo ay ku qorantahay OGOLAANSHAHA JOOGITAANKA"

II. Waxaa la idin siin doonaa dukumiintigiina safarka kadib codsigiina taasoo la idinka rabo in aad bixisaan lacag dhan 85yuro. Haddii aad heysatid sharciga bini'aadanimada (aanan heysan kan qaxootinimada) aad heysatid ama aad keeni kartid passport ka soo baxay dowlada wadankaada, ma la idin soo saarayo dukumintiga safarka waxaad awood u leedahay in aad ku safartid passporka wadankaada.
III. Waxaad xaq u leedahay in aad shaqeysatid.
IV. Waxaad heli doontaa daryeelka isbitaaleed.
V. Carruurtaada waxa ay tegi karaan iskuulka.
VI. Si kastaba ha ahaatee dowlada idinma siineyso guri shaqana idinma balan qaadi karto idinma siin karto xitaa lacagta ceyrta ah oo aan ahayn ceyrta dadka naafada ay qaataan.

***5. Kadib markii aad qaadatid go'aanka magangalyada caalamiga ahi(Qaxootinimada ama kan bini'aadanimada) maxay tahay proseska laga rabo in aad raacdid si aad u qaadatid degenashaha iyo dukumintiga safarka?***

Waxaad ka qaadatay go'aankii xarunteena .waa in aad aadaa xarunta poliska giriiga ee Athens adreska ALLODAPON wadada Petrou Rally 24.si aad u geyso waxa lagaa rabo si laguugu soo saaro karka degenashaha. Kadib bil ama bil iyo bar  geynta warqadahaasi waa in aad timaadaa xarunta adeega magangalyada si aad u qaadatid degenashahaada Isla mar ahaantaa waxaad samayn kartaa codsiga dukumintiga safarka. Loomana baahno in aad sugtid degenashaha kadibna aad dalbatid passporka. Labada proses isku mar baad wada dalban kartaa.

***6. Dadka waaweyn iskuul ma dhigan karaan? Halkee ka baran karaan luuqada Giriiga?***

Dadka waaweyn waxa ay helaan waxbarasho shuruud oo waqti ahi. Dowlada waxay ugu deeqeysaa barashada luuqada giriiga. Waxaana lagugu wargalinayaa ogeysiisyada xarunta magangalyada,  jaaliyadaha ama ururada aan dowliga aheyn ee ku firfircoon arintaasi.

***7. Ma u safri karnaa yurubta kale?***

Habka kaliya ee ugu safri karo qof magangalyo dalbaday yurubta kale waxa ay tahay  proseska Dublin 3, arinta mideynta qoysaska iyo dadka magangalyo doonka awood uma lihid in aad u safartid yurubta kale, marka laga reebo haddii

ay jiraan arimo Qatar ah oo caafimaadka ku saabsan taasi oo marmarsiyo u noqon karto u gudbinta dibada.
Haddii aad qaadatid sharciga qaxootinimada ama kan bini'aadanimada waxaad awood u leedahay in aad dalbatid dukumintiga safarka. Dhameenta qaadashada dukumintiga safarka waxaa laga yaabaa in ay kugu qaadato 1-2bilood.
Dukumintiga safarka aad qaadan doontid waxa ku tagi kartaa dhamaan wadamada yurub laakin uma guuri kartid wadamandaasi. Waxaad wadankaasi joogi kartaa 3bilood 6biloodwalba. kadib dhamaadka 3da bilood waa in aad ka tegtaa.
Si aad u degto waddan kale oo Yurub ah waa in aad buuxisaa shuruudaha u dhigan dalka kale Yurub ee muwaadiniinta dalka saddexaad.

8. ***Awood ma u leeyahay qofka heysta sharciga bini'aadanimada/qaxootinimada in uu ku safro dukumitigiisa wadamo ka baxsan midowga yurub?***

Wuu aadi karaa laakiin waa in uu qaataa Viso kana soo qaataa safaarada/qunsuliyada wadanka uu doonayo in uu booqdo, waxaana loo baahanyahay in tegtid safaarada ama qunsuliyada wadanka aad dooneysid in aad booqada si ay kuu siiyaan faahfaahin dheeraad ah.

9. ***Yaad awood u leeyahay in aad dacwad furto dhanka Dublinka?***

Carruurta yar yar ee aan lala socon waxa ay ku midoobi karaan walidiintooda, walaalahooda, adeerradooda iyo awoowayaasha/ayeeyo.
Dadka isqabo waa ay isku midoobi karaan.
Waalidiinta carruurtooda waa ay ku midoobi karaan.
Dadka qaangaarka ahi (tusaale ahaan walaalaha waaweyn, waalidiinta carruurtooda qaangaarka ahi) waxa ay isugu midoobi karaan si gaar ahi marka ay jirto dhibaato caafimaad oo halis ah. Qof da' ahi oo u baahan xanaanada qof ay qaraabo yihiin IWM.

10. ***Warqado noocee ah baa loo baahantyahay proseska dublineka?***

Waa in aad heysataan warqado cadeynayo in xubin qoyskada ka mid ah uu joogo wadankale oo yurub ka tirsan ahna magangalyo doon ama heysto sharciga caalamiga ah (qaxootiga ama kan bini'aadanimada) wixii warqado ah cadeynaya xiriirka idinka dhaxeeyo qoys ahaan waxaa haboon in aad keentaani.

11. ***Haddii aan qaadano sharciga qaxootinimada side ugaaga keeni karnaa qoyskeena (wadan aan midowga yurub ka mid aheyn)?***

Dadka heysta sharciga qaxootinimada waxa ay xaq u leeyihiin in ay ku midoobaan qoyskooda ama xubnaha qoyska ka tirsan kuwaas oo jooga wadanka

aad u dhalatay sida (xaaska iyo carruurta yaryar). Waa in aad xarunta u soo gudbisaa codsigaada qaaska ahi. Proseeskani waxa uu u baahnaan doonaa muddo dheer iyo maamul, waxaana ku lug yeelan doono wasaarada arimaha dibada, lamana ogaan karo waqtiga ay qaadan doonto.

***12. Ma in aynu heysano baa guri iyo shaqo hadii aan dooneyno in aan keeno xubin qoyska ka mid ah giriiga?***

Haddii aad soo gudbiso arjiga isu keenida qoyska saddex bilood gudahooda kadib qaadashada sharcigaqaxootinimada uma baahnid in aad la kulanto xaaladahani.

***13. Waa maxay waraaqaha loo baahan yahay iyo proseska soo socdo?***

- shahaado ama dukumeenti kale oo si rasmi ah laguna tarjumay Giriigga iyo lana soo saaray istambo dowlada Giriigga ah, muujinaya xiriirka qoyska iyo dadka noqonaaya qaxootiga iyo da'dooda.
- Kobi sax ah dokumiintiyada safarka ee xubin ama xubnaha qoyska.
- halka uusan qaxootiga ka keeni Karin dukumiintiyada kor ku qoran, mas'uuliyiinta dowlada iyo kuwa baara magangelyada waxa ay ku xisaabtamaan cadeymo kale oo cusub. Go'aanka diidmada dalabka Malaga yaabo in u saleeysmo oo keliya jiritaanka qoraalladani.
- Kadib aqbalida codsigaada xarunta magangelyada waa in qunsuliyada giriiga dhiibtaa dal ku gal ( visa) si uu u yimaado qofka qoyskaada ka mid ah giriiga.
  <u>Qunsuliyada ama safaarada si ay u dhiibto dal ku gal (visa) waxay u baahantahay.</u>
- Baasaboor ama dukuminti kale oo laga aqoonsanyahay wadankeena, aan dhacsaneyn kaasoo ka badan 3bilood waqtiga visaha.
- kobiga warqada diiwaanka dambiga ah ee ka soo baxday xarunta ka mas'uulka ah shisheeyaha taasoo cadeyneyso xaaladda dembiyada ee dalbadaha. Haddii ay jiraan xaalado ama go'aan kama dambeys ah oo maxkamaddeed, taasoo ku xiran dembiga sababaayohalisna ku noqon kara nidaamka iyo nabadgelyada bulshada lana, doonayo sababo gaar ah oo qeyb ka ah qof miisaan leh sida heerka darnaanada, gurashada, iyo in akhlaaqda denbiilenimada guud ee qaran ee dalka saddexaad.
- Shahaado caafimaad oo ay aqoonsantahay dowlada ama hay'ad gaar loo leeyahay taasoo cadeyneyso in aysan jirin wax cudur ahi kaasoo khatar ku ah caafimaadka dadweynaha ee waafaqsan xeerarka caalamiga iyo Ururada Caafimaadka Adduunka iyo cudurada kale ee faafa, qaadsiiyo si loo ilaaliyo caafimaadka dadweynaha.

14. ***kaarka degenashaha aad na siineysaan ma ku safri karnaa  oo ma ku tegi karnaa yurub?***

Maya, waxaad u baahantahay dukumiintiga safarka.

15. ***Ma safri karaa qof loo aqoonsaday qaxootinimo giriiga banaankiisa arimo halis ah ama degdeg ka hor qaadashada dukumiintiga safarka?***

Maya. Laakiin haddii ay jiraan sababo bani'aadamnimo muuqda oo degdeg ah, waxaa laga yaabaa inay dedejiso hawshani.

16. ***Intee in le'eg bay ku qaadan kartaa soo saarida dukumintiga safarka marka uu qofka sameynayo  codsiga oo uu heysto jawaabta ogolanshaha?***

Ku dhawaad bil ama bil iyo bar.

**17.** ***si aad u qaadatid dhalashada giriiga maxaa loo baahanyahay?***

Xaaladahani waxaa loo fiirinayaa qaanuunka dhalashada giriiga. Iyadoo la soo koobayo waa in aad:

1. waa in aad tahay qof qaan gaar ah (ka weyn18sanno).
2. waa in aan la idinku xukumin danbiyo qaas ah aan ka soo noqosho la heyn. kuwaasooloo eegaya qodobka 5aad ee qanuunka dhalashada giriiga.
3. waain la idin aqoonsaday qaxootimo/ bini'aadanimo ama aad xubin ka tihiin qoys loo aqoosaday qaxootinimo/ bini'aadanimo heystaani kaarka ogolaanshaha degenashaha. ADET.
4. waa in aad joogtaa giriiga si sharci ah ku dhawaad 3sanno oo joogta ahi waa haddii aad heysatid sharciga qaxootinimada ama 7sanno oo joogta ahi hadii aad heysatid sharciga bini'aadanimada.
5. waa inaad heysataa aqoon kugu filan oo luqadda Giriigga.
6. waain aad si habsami leh ugu biirtaa dhaqaalaha iyo nolosha bulshada ee dalka oo aad fursad u leedahay in aad ka qeyb qaadatid si firfircoon oo wax ku ool ahi nolosha siyaasada ee wadanka iyadoo la raacayo qaanuunka  jideynaayo qodobka 5A qaanuunka dhalashada giriiga.

**18.** ***imisa ayaan heysan karaa degenashaha ADET. iyo dukumintiga safarka?***

Waqtiga kaarta degenaashaha waa 3sanno. waxaana cusbooneysiineysaa codsigaada kadib.

Dukumiintiga safarka waxaa uu kuu shaqeynayaa 5sanno.

**19*. Haddii aynu heysano waalid ama walaalo ku nool meel yurub ka baxsan kuwaasoo nala noolaa jiray inaguna tiirsanaa inta aanan soo bixin ka hor aysan jirin qof xanaaneysa, suurto gal miyaa in la isku midoobo?***

Si gaar ah waxa ay noqon karaan keenida qoyska qof weyn oo qaxooti ahi waalidka.

Marka laga reebo wixii aan kor ku xusanay oo ku saabsan mideynta qoyska waa in sidoo kale ay soo saaraan:

1. Shahaado ka soo baxday waaxda arimaha bulshada taasoo cadeyneyso in qofka qaxootiga ah leeyahay caymiska jirrada taasoo ku wajahan dhamman qatarada iyadoo loo fiirinayo noocyada shaqalaha guryaha kaasoo dabooli kara baahida xubnaha qoyska ee ku tiirsan qofkani.
2. Jeega bixinta cashuurta ama dukumiinti kale ee bulshada, taasoo cadeynayo dhaqaalaha shakhsi ahaan sanad walba soo galo, kuna filan baahida qoyska, kuwaas oo aan aheyn nidaamka bulshada ee dalka. Dakhliga Tani ma noqon karo in ka yar tahay mushaharka uu sannadkii shaqaalaha aan xirfada lahayn, ayaa kordhay 20% ee xaaska iyo 15% ee caruurta iyo waalid kasta oo.

*3*. Warqada heshiiska guri gadashada oo shabadeysan iyo heshiiska kirada kana soo baxday hey'ada dhaqaalaha bulshada ama warqada kale oo shabadeysan oo cadeyneyso in qofka qaxootiga ahi in uu wax bixiyo taasoo dabooli karta baahida gurigiisa iyo tan qoyskiisa.

Walaalahaa iskuma midoobi karaan.

**20. *waa maxay ficilada sharci darada kuwaasoo kaa qaadayo sharciga qaxootinimada/kan bini'aadanimada ama idinku hogaamin kara in nalaga ceshto sharciga?***

Ficilada hoos ku qoran waxaa laga yaabaa /cadeynayaan in ay kaa qaadaan ama laga ceshto (sharciga qaxootinimada ama kan bini'aadanimada) Xukunka dambi ama ciqaab dhimasha taasoo lagu ciqaabayo ku dhawaad 3sanno ama dembiga waxyeellada jirka ee daran*qaynuunka ciqaabta*(QC310),afduub carruurta (QC324), afduub ula jeeda ahi (QC 327), weerar sharafta galmada (QC 337 Qeybta 2-5), sasabashada carruurta (QC 339), ku xad gudbida galmada carruurta. (QC 342), ka sameynta carruurta filimada xunxun. (QC 348A), U jiidashada carruurta galmada(QC 348B), ), ku daneysida galmada qaldan, ka faa'ideysiga dhilada,faraxumeynta ciyaalka iibinta, baadda(QC 385)

**21*. Ma iska casili /kansalid karnaa magangalyada caalamiga ahi (Magangalyada, ama kan bini'aadanimada) mar kasta oo aad rabtid?***

Ka bilowga proseska magangalyada waad iska casili kartaa xilligii aad doontid. Sidoo kale, waxaad iska casili kartaa sharciga qaxootinimada iyo kan bini'aadanimada, markaad qaadataan kadib. Taasoo micnaheedu yahay iska casilida kadib waa in aad ka tegtaa gariiga, hadii kale waxaa ku joogaa sharci darro wadanka haddii aad u baahatid

in aad dib mar labaad u dalbatid magangalyada, codsiga labaad wuu adkaan doonaa in la aqbalo